



Ujeeddo: Baahin Shaqo Banaan

Nooca Shaqada: Kaaliye

Goobta Shaqada: Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

Tirada Shaqooyinka Banaan: 10 Kaaliye

Taariikhda Qabashada codsiyadu bilaabmayaan: 09/08/2023

Taariikhda qabashada codsiyadu xidhmayaan: 19/08/2023

Hordhac:

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka (XIGQ), waa Xafiis xubin ka ah Hay'adda Garsoorka Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, u madaxbanaan shaqooyinkiisa, muhiimna u ah dawladdnimada, dabaqidda Xeerarka iyo Shuruucda Dalka iyo sarreynta sharciga. Waa Xafiis adeeg lagama maarmaan ah siiya shacabka Soomaaliyeed. Waxaa waajibaadkiisa iyo Masuuliyadihiisa ka mid ah:

- Dhowrista u feejignaanta sharciga iyo difaacidda xuquuqda Hay'adaha Dowladda.
- Ladagaalanka, dhaqaajinta iyo Dacwo-oogista denbiyadda ciqaabta ah.
- Hagista baarista dacwadaha ciqaabta ah iyo maxkamadayntooda.
- Ilaalinta iyo dhowrida Xuquuqaha kala duwan ee mawaadiniinta Soomaaliyeed.
- Xaqiijinta sarreynta sharciga iyo ku dhaqanka Xeerarka Dalka iyo fulinta go'aamada sharci ee ka soo baxa Hay'adaha Dawladeed ee kala duwan.
- Kormeeridda xaaladdaha nololeed iyo ilaalinta xuquuqda dastuuriga ah ee maxaabiistu leeyihiin.
- Dhaqaajinta dacwadaha madaniga ah danta guud owgeed.
- Racfaan ka qaadashadda xukunadda iyo go'aanadda kale ee ka soo baxa maxkamadaha.
- Samaynta cilmi baariso la xiriira dacwadaha horyaala Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo sharciyada uu dabaqayo.
- Iyo u doodista xuquuqda agoonta, dadka nugul iyo Ilaalinta Danta Guud ee cadaaladda.

Haddaba, si uu Xafiisku u guto waajibaadkiisa balaaran, una Xaqiijiyo waajibaadkiisa sare ku xusan, waxaa baahi loo qabaa in la qaato xubno Kaaliyayaal cusub oo ka qaybqaata taabbagalinta hawlaha loo igmaday Xafiiska. Habka shaqaale qaadashadan waa mid dhexdhexaad ah, hufan, daahfuran, oo cadaalad ku dhisansan.

Shuruudaha qofka Kaaliyaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud loo qaadanyo:

1. Wa inuu yahay/tahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, dhimirkiisu dhan yahay.
2. Waa in uusan/ayasan gelin danbi Maxkamadi ku xakuntay si kama danbays ah.
3. Waa in aysan da'diisu ka yareyn 20 sano.
4. Waa inuu heysto/haysato ugu yaraan shahaadada Diploma sharciga ama wax u dhigma ama shahaado Jamacadeed oo la aqoonsan yahay sida (law, IT, Public Relations iyo Business Administration).
5. Waa in uu leeyahay/leedahay xirfadda Qoraalka oo aad u heer sarraysa (gacan ku qorid iyo computer ku qorid) intaba.
6. Waa in uu aqoon fiican u leeyahay/uledahay adeegsiga aaladda computerka.
7. Waa in uu leeyahay/leedahay anshax iyo sumcad wanaagsan bulshadda dhexdeeda.
8. Waa in uu leeyahay/leedahay xirfadda xariirka dadweynaha iyo wada-shaqeynta.

Sida loo soo codsanayo shaqadan:

- Qofka danaynaaya shaqadan waxa uu ku soo diri karaa codsiyadiisa shaqo, macluumaadka taariikh nololeedkiisa [CV], nuqul kamid ah shahaadooyinkiisa jaamacadeed, Taraaniskiribtiga iyo Sawir teesaro nooca baasaboorka, E-mail kan: hr@ago.gov.so.
- Qabashada Codsiyada shaqo waxa ay xidhmaysaa **19/08/2023**, saacadu markay tahay **12:00 PM** (habeenimo).